

FAAHFAAHIN KU SAABSAN HEALTHINFONET IYO FOOMKAAN DIB U AQBALIDA

Waa maxay HealthInfoNet? HealthInfoNet waa nidaam kumbuyuutareed amaan ah oo xogtaada caafimaadka kaasoo qaadaaya goobaha kaladuwan ee daryeelka caafimaadka kadibna soo gelinaaya diiwaanka elektarooniga ah ee caafimaadka ee gobalka. Dhakhaatiirtaada ayaa adeegsanaaya xogtaan si ay go'aanno uga gaaraan daryeelkaaga. Waxay sidoo kale ka caawinaysaa kahortaga khaladaadka, gaar ahaanna marka xaalad degdeg ah jirto. Diiwaankaaga caafimaadka waxaa ku jira xog ku saabsan daawooyinkaaga, xasaasiyaadka, natiijooyinka baaritaanka, iyo kuwo kale.

Diiwaanadaydu ma yihiin kuwo qarsoodi ah oo amaan ah? HealthInfoNet ayaa baasweer ku xirta dhammaan xogta waxayna adeegsataa xariirada kumbuyuutarka oo amaan ah si ay u hesho uga gudbisoo xogtaada caafimaadka. Keliya dadka qaybta ka ah daryeelkaaga ayaa arki kara xogtaada caafimaadka. Si aad wax badan uga ogaato cidda aragtay xogtaada ku jirta diiwaanka HealthInfoNet iyo xiliga ay arkeen, waxaad booqan kartaa <http://hinfonet.org/for-patients>. Ogoow inuusan jirin nidaam gebi ahaanba amaan ah, laakiin HealthInfoNet ayaa samayaysa dedaal kasta si ay u dhawro badqabka diiwaankaaga.

Maxay ka dhigan tahay inaan "dib u aqbaloo"? Haddii aad horay u dooratay in xogtaada xasaasiga ah aan lagu faafin diiwaanka HealthInfoNet (tusaale, aad diiday), laakiin aad hadda kadib doonayso inaad xogta la wadaagto dhakhaatiirta ku jirta nidaamka HealthInfoNet, waa inaad dib u aqbashaa (tusaale, kala laabataa diidmada) ka qaybgalka adeegaan. Buuxinta foomkaan ayaa ogolaanaysa in xogtaada guud ee caafimaadka markale la faafiyo. Marka aad sidaas samayso, diiwanakaaga HealthInfoNet ayaa bilaabaaya inuu xogta caafimaadka soo aruursho laga bilaabo taariikhda foomkaan iyo wixii ka danbeeya. Wixii xog dheeraad ah, waxaad booqan kartaa xogteena faahfaahsan oo aad ka helayso oonlaynka: <http://hinfonet.org/for-patients>.

TILMAAMAHA:

- **HADDII AAD HORAY U DIIDAY AADANA DOONAYN IN LA FAAFIYO XOGTAADA, WAXBA HAKU SAMAYN FOOMKAAN.**
- **HADDII AAD HORAY U DIIDAY AADNA DOONAYSO IN LA FAAFIYO XOGTAADA, FADLAN BUUXI FOOMKA HOOSE.**

Haddii aad doonayso inaad dib u aqbasho la wadaagista xogtaada guud ee caafimaadka HealthInfoNet, fadlan buuxi DHAMMAAN qaybaha foomka soo socda kadibna boostada ugu dir HealthInfoNet oo ku taala 60 Pineland Drive, Auburn Hall, Suite 305, New Gloucester, ME 04260 ama fakiska ugu dir [207-541-9258](tel:207-541-9258).

Taas badelkeed, haddii aad doonayso inaad foomkaan ku buuxiso oonlaynka fadlan halkan ku buuxi: <https://map.hinfonet.org:8443/patientoptions/optin>

WAXAAN DOORTAY INAANAN XOGTAYDA CAAFIMAADKA GUUD LA WADAAGO HEALTHINFONET

Magaca Koobaad		Magaca Dhexe		Magaca Ugu danbeeya	
Ciwaanka		Magaalada		Gobolka	Koodhka Aaga
<input type="checkbox"/> Lab	<input type="checkbox"/> Dhedig	<input type="checkbox"/> X	/	/	-
Jinsiga		Taariikhda Dhalashadda (bisha/maalinta/sanadka)		Lambarka Social Security (qasab maaha)	
Lambarka taleefanka (XXX-XXX-XXXX)			Ciwaanka Emailka		
Marka aan saxiixo, waxaan fahmayaa in xogtayda caafimaadka guud ay heli doonaan dhakhaatiirtu ayagoo adeegsanaaya HealthInfoNet.					
Saxeexa Bukaanka/Masuulka Sharciga ah			Taariikhda (bisha/maalinta/sanadka)		